

Wargeyska Mountain View

Maarso 22, 2017

Talaado, Maarso 28.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30, CLC
Isniin, Abriil 10 - Jimco, Abriil 14.....Ma Jiro Dugsi, Fasaxa Guga (Spring Break)

Fariinta Agaasimaha

Todobaadkii la soo dhaafay, ardaydena waxay tageen kullaan ay soo qabanqaabisay Netsmartz, urur u xil saaran in uu ardayda baro ammaanka inta ay ku sugan yahii internetka. Waxaan mahad celin u jeedineynaa xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Utah (Utah Attorney General's office) kafaaladda iyo taageerada uu siiyay kullankaan. Ardaydena waxay barteen waxyaabo muhiim ah sida in aan dadka kale la siinin macluumaadkaada shakhsiga inta uu qofka ku sugan yahay internetka, in qof weyn oo lagu kalsoon yahay loo sheego marka ay internetka ku arkaan wax cabsi geliya ama ku abuura fahmo darro, iyo in aysan marna ka qeybgelin cago jugleynta internetka. Fadlan qaado waqti aad caruurtaada kala hadashid ammaanka internetka. Internetka waa qalab wanaagsan oo wax laga barto lagana ogaado waxyaabaha ka jira dunidena. Marka sida habboon loo isticmaalo lana dhowro ammaanka, internetka waxaa laga heli karaa waxbarasho, nasasho, iyo xariirin. Aan dhamaan habsano in waxbarashada, nasashada, iyo xariirinta yahii kuwo habboon oo ammaan ah. Waa muddan tahay marka la fiiriyo farxadda caruurtena.

Tartanka Fanka Mountain View

Gugaan, waxaan qaban doonaa tartanka fanka. Fikradda tartankena fanka waa "Ku Dhaqan Sharciga Dahabiga." Sharciga Dahabiga waa in loola dhaqmo dadka kale sida aad adiga rabtid in laguula dhaqmo. Ardayda waxay geli karaan fanka qeybaha soo socda: dheesha, safidda, suugaanta, soo saarka muusikada, sawirada, iyo fanka la daawado. Ardayda waxay geli doonaan mid ka mid ah labada qeyb, pre-K ilaa darajada labaad ama darajada saddaxaad ilaa darajada shanaad. Si ay u galaan, ardayda waa in ay fankooda u soo gudbiyaan macalinka fasalkooda ugu dambayn dhamaadka maalin dugsiyeedka, bisha Maajo 12. Waxaan rabnaa in uu qof kasta ogaado iminka si ay u helaan waqti ku filan oo looga shqaqeeyo gelitaankooda. Waxaa jira macluumaad ku saabsan sharuudaha tartanka, kuwaasoo la socda wargeyska loo soo diro guriga. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ama koobi kale oo ku saabsan sharuudaha, waxaad arki kartaa Mr. Elliott oo laga helo Qolka 102 (Room 102) ama waxaad xafiiska weyn weydiin kartaa meesha isaga laga helo.

Labiska dugsiga

Waxaan aragnaa arday badan oo aan qabin labbiska dugsiga. Xasuusin ahaan, ardayda waa in ay soo qaataan labbis midabadiisu ka kooban yahay baluug, caddaan, iyo khaki. Waxaan dhawaan baddalnay labbiska si loogu darro baluugga culus. Waxaan kaloo ogolaanay isbaddal oo u ogolaan doono ardayda in ay soo qaataan labbis kasta oo mattala jaamacad. Waxaan xoogga saarnaa sida aan u yeelano hiddaaha kulliyadda. Waxaan rabnaa in ay ardayda isu arkaan sida ardayda jaamacadda, mustaqbalka. Mountain View, waxaan soo dhaweyneynaa labbis kasta oo mattala kulliyadda, jaamacadda, ama waxbarashada machadka ka dambeeyo dugsiga sare maalin kasta oo ka mid ah todobaadka.